Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya
Wasaaradda Maaliyadda
Xafiiska Wasiirka

جمهورية الصومال الفيدرالية
وزارة المالية
مكتب الوزير

Federal Republic of Somalia
Ministry of Finance
Office of the Minister

**Ref: MOF/OM/0241/2025** **August 23, 2025**

| | |
|---|---|
| Ku: - Dhamaan Wasaaradaha XFS | =Mugadisho= |
| Ku: - Agaasinka Miisaaniyadda ee W/Maaliyadda | =Mugadisho= |
| Ku: - Xisaabiyaha Guud | =Mugadisho= |
| Ku: - Hanti-dhowrka Guud | =Mugadisho= |
| Ku: - Bangiga Dhaxe ee Soomaaliya | =Mugadisho= |
| Ku: - Garyaqaanka Guud | =Mugadisho= |
| Ku: - Xeer Illaaliyaha Guud | =Mugadisho= |
| Ku: - Guddiyada Madax Banaan | =Mugadisho= |
| Ku: - Dhamaan Ciidamada Qalabka sida | =Mugadisho= |
| Ku: - Maamulka Gobolka Benaadir | =Mugadisho= |
| Ku: - Maxkamadaha | =Mugadisho= |
| Ku: - Ururada Bulshadda | =Mugadisho= |
| Ku: - Hayadaha Gaarka | =Mugadisho= |
| Ku: - Rugta Ganacsiga | =Mugadisho= |
| Ku: - Ururada Bulshadda Rayidka | =Mugadisho= |
| Ku: - Aqoonyahanada | =Mugadisho= |
| Ku: - Ururada Dhalinyarada | =Mugadisho= |
| Ku: - Ururada Haweynka | =Mugadisho= |
| Og: - Xafiiska Raisulwasaaraha XFS | =Mugadisho= |
| Og: - Xafiiska Gudoonka Golaha Shacabka | =Mugadisho= |
| Og: - Xafiiska Gudoonka Aqalka Sare | =Mugadisho= |
| Og: - Xafiiska Maxadtooyadda DFS | =Mugadisho= |

**Ujeeddo: Martiqaadka Kaqaybgalka Shirka Wadatashiga Miisaaniyadda Qaranka ee 2026-ka**

Dhammaan cidda ay khusayso,

Wasaaradda Maaliyadda Xukuumadda Federaalka Soomaaliya waxay ku faraxsan tahay inay kugu casuunto **Shirka Wadatashiga Miisaaniyadda Qaranka ee 2026-ka**, kaasoo lagu qaban doono magaalada Muqdisho **27-ka illaa 29-ka September 2025-ka.** Goobta**, Hotel Doorbin.**

Wadatashiyadan ayaa qeyb ka ah ballan qaadka ay dowladdu ku dooneyso in muwaadiniinta iyo dhammaan dhinacyada ay khuseyso ay ka qeyb geliyaan ka doodista miisaaniyadda qaranka ka hor inta aan la horgeyn baarlamaanka. Shirarka ayaa ah madal ay dhammaan dhinayada kale duwan ee Bulshadda ku wadaagi karaan aragtidooda, ugana doodi karaan waxyaabaha mudnaanta leh, isla markaana ay ka bixin karaan jawaab celin ku saabsan sida loo isticmaali karo dakhliga Dalka. Dooddan laba-geesoodka ah waxay gacan ka geysan doontaa hubinta in miisaaniyaddu ay

Ministry of Finance
Corso Somalia Street, Shangaani District Mogadishu, Somalia
P.O. Box 106
Email: minister@mof.gov.so
www.mof.gov.so

ka tarjumayso baahiyaha dhabta ah ee shacabka, kor u qaadida hufnaanta, dhisida kalsoonida bulshadda iyo isla xisaabtanka dadweynaha iyo Dawladda.

Saddexdan maalmood, masuuliyiin ka socda hay'adaha dawladda, bulshada rayidka ah, aqoonyahannada, ganacsatada, warbaahinta iyo dhammaan bulshada ayaa isu iman doona si ay dib u eegis ugu sameeyaan waxqabadkii miisaaniyadda, isla markaana ay ka qaybqaataan waxna ka ogaadaan xaaladda dhaqaalaha Dalka, isla markaana ay ka doodaan caqabadaha maaliyadda dawladda. Ka qaybgalayaashu waxa kale oo ay fikradahooda ka dhiiban doonaan tallaabooyinka dakhliga cashuuraha ee ay dawladdu soo jeedisay, mudnaanta Kharashka Miisaaniyadda mudada dhexe ee 2026-2028, mashaariicda waaweyn ee qaranka ee la qorsheeyay, iyo qoondaynta qaybaha sida, waxbarashada, caafimaadka, kaabayaasha iyo qaybaha kale ee kaabayaasha dhaqaalaha.

Wada tashiyadan ayaa noqondoona mid loo baahiyo si toos ah si ay bulshadu ula socdaan xaalka guud ee Miisaaniyadda Dalka, si ay uga falceliyaan Miisanaiyadda. Si aad uga soo qaybgasho, waxaa lagaa codsanayaa inaad iska diiwaan geliso ugu dambayn **31ka Agoosto 2025** adoo isticmaalaya xidhiidhkan: [Registration Form]. Ka qaybgalayaasha isdiiwaangaliya waxay heli doonaan faahfaahinta goobta, jadwalka, iyo macluumaad kaloo dheeri ah.

Ka qaybgalkiina waxa ay gacan ka geysan doontaa in la hubiyo in miisaaniyadda qaranku ay ka tarjumto baahiyaha iyo mudnaanta dhammaan dadka Soomaaliyeed, waxay xoojinaysaa hufnaanta iyo isla xisaabtanka, waxayna gacan ka geysan doontaa dib u dhiska dalkeenna, Waxaan rajaynaynaa ka qaybgalkaaga iyo waxtarkaaga qiimaha leh.

**Taariikhda, 27, September 2025, Hay'adaha Dawladda, DXDF, iyo Warbaahinta.**

**Taariikhda, 28-da September 2025, Ururada Bulshadda Rayidka, iyo Warbaahinta**

**Taariikhda, 29-ka September 2025, Urrurada Ganacsatada, iyo Warbaahinta .**

24/08/25

**Xil. Biixi Iimaan Cige**
**Wasiirka Wasaaradda Maaliyadda**

JAMHUURIYADDA FEDERAALKA SOOMAALIYA
FEDERAL REPUBLIC OF SOMALIA
OFFICE OF THE MINISTER
XAFIISKA WASIIRKA
MINISTRY OF FINANCE
WASAARADDA MAALIYADDA